

Farsamada ama teknikada.

Madoonaysaa in aad baratid farsamada ama teknikada ee sidaweyn muhiimka ugu ah bulshada?

Madoonaysaa in aad farsamada teknikada in aad ku dabaqdid hab farshaxan ah, ama in aad ku baratid luqadaha?

Madoonaysaa in aad shaqeysid kadib marka aad dhameysid waxbarashada dugsiga sare, waliba adigoo heesta fursad ah in aad waxbarashadaada aad sii wadan kartid?

Madoonaysaa in aad baratid sida loo lahaado shirkado?

Madoonaysaa in aad baratid xirfad aad loo gubaahanyahay , islamarkaana leh dad aqoonteda leh ?

Haddaba waxbarashadan teknikada ah waa mid adiga ku gu haboon.

Farsamada teknikada waxa aad barandoontaa, oo aad kashaqeen doontaa habka teknikada loo horumareyo. Lagabilaabo fikrado ama hindisaadyo ilaa iyo waxsoo saaritaano kaladuwan oo leh qalabyo, ama walxood. Waxa aad barandoontaa qaab sameenta walxaha iyo suuqgeeynta iyo iibitaanka, iyo garashada khatarta ayku luglahaan karto waxyaalaha lasameeyo qaarkood dabeecada, iyo biniaadankaba. Maadaama teknikadu ay noqotay mudadan danbe midisbedelo horumarino casriya sameysa, waxa lagama maarmaan ah in aad ogsoonaatid qalabyada iyo teknikada eynu u baahanahay, iyo waxa aynu u adeegsandoono iyo adeegsankarnoba, iyo eynu u isticmaali doonin.

In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada aad wadatid.

Waxbarashadan teknikada, ama farsamada waxa uu ardeygu uu lahaan karaa habab kaladuwan oo u sahlikareysa wax barashadiisa. Haddii uu ardeygu uu doonayo in u udiyaar garoobo waxbarasho heer jaamacadeed ah, fursadaas na waa suuro gal in uu ardaygu uu helo. Waxaa kaloo iyadana suutogal ah in haddii uu ardeygu uu doonayo in uu shaqo doonto kadib marka uu dhameeyo wax barashada dugsiga sare.

Haddii aad dooneysid in aad waxbarashadaada aad sii wadatid ilaa iyo mid heer jaamacadeed, waadsii wadan kartaa. Waxaanad mustaqbalka noqonkartaa tusaale ahaan sida, farsamoyaaqaan diyaaradeed, farsamayaqaanka baabuurta. Haddii aad waxbarashadan farsamada aad u qaadatay si maado ama casharo ah, waxaad markaa aad waxbarashadaada siheer jaamacadeed ah aad kasii wadankartaa jaamacada farshaxanka.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Waxaa jira shaqooyin aad doonankartid marka aad qalinjabisid waxbarashada dugsigasare ee teknikada ama farsamada ah.

Waxaad tusaalo ahaan aad iibin karta qalabyada adeega bulshada ah ama waxaad cawin kareysaa oo aad kashaqeynkartaa tukanada ey dadku ka iibsadaan qalabada kaladuwan ee teknikada ah. Waxaad kalood ka shaqeen kartaa warshadaha wax soosaarka.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashad farsamadu waxa ay kakoobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganaysa dugsiga sare ey qaataan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo

kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashadan farsamada oo keliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar aad u doorankartid.

Waxbarashadani malaha waxbarasho guud oo takhasusah oo ay u wada simanyihiin dhamaan iskuuladoodhami. Waxaa laakinse jirta in uu iskuulkastu uu sameesankaro lahaankarona takhasuso u gaar ah oo ku wajihan farsamada ama teknikada. Waxaana kamid ahaankara tusaale sida, habka ama qaabka loo sameeyo walxaha, warbaahinada lagu wada xidhiidho, farsameyaqaanka internetka ama isku xidhka warbaa hinta, farshaxanka dhismaha, farsameyaqaan iyo lahaansho shirkadeed, farsamo yaqaan wax soosaarka warshadaha, dabeecada –iyo dhismayaasha bulshada, isgaarsiinta, eliktroonikada, iyo farsamada casriga ee shidaalka baabuurta loo adeegsado.

Waxaa laga yaabaa in aad jeceshahay in aad wax ku takhasuustid oo aad ka dhigatid meel kale? Waxaad weydiinkareysaa, kalan tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yr. kesvägledare) haddii aad kadhigan kartid wax barashadaas aad dooneysid meelo kale. Haddii aad heshidna waad ka dhigan kartaa.

Xiidhiika suuqa shaqada

Waxbarashadan farsamadu malaha tababar ah aqoon xirfadeed (APU) laakinse fursad ayaad jirta ah in aad shaqo aad raadsankartid oo aad shaqeysankartid inta waxbarashada dugsiyada sare aad ku jirtid. Tababarkaana waxaa kuu diri kara iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhawmeesha aad degen tahay. Waana habka u wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiidhkaas oo aad markale aad kagafaa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka. Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada, way surtogol noqon kareysaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaad haysataa fursad aad u weyn oo aad shaqo aad ku heli kartid kadib marka aad wax barashada farsamada dugsiyada sare aad dhameysid. Haddii aad siiwadatid wax barashadaada ilaa iyo heer jaamacadeed waxaa markaa sii xoogeysaneysa helitaanka fursadahaaga shaqo. Aad ayey u yaryihiin dadka bartay teknikada ama farsmada. Shirkado farabadan ayaa aad ugu baahan dad soo bartay teknikada ama farsmad, iyo waxaa kaloo looga baahanyahay xataa meelo kale oo kaladuwan oo dunida ka midah.